

## Barnaamijka Maamulka Kiiska Horumarsan

### Guudmarka

Barnaamijka Maareynta Kiiska La Wanaajiyay ayaa caawinaya marka walaacyada caafimaadka iyo bedqabka ay macaamiisha geliyaan halis xadgudub ama dayac oo sarreysa. Shakhsiyadka iyo qoysaska waxay u baahan yihiin taageero dheeraad ah markay jiraan walaacyo ku saabsan gooni-soocid, deegaanka guriga ama tayada daryeelka. ECMP waxay bixinaysaa maamulayaasha kheyraadka kiiska oo tirada kiisaska ay hayaan yihiin 30 ama ka yar kuwaas oo bixin kara taageero gaar ah. CRMs waxay sameyn karaan booqashooyinka guriga ugu yaraan hal jeer afar bilood kasta.

ECMP waxay kor-u-qaadeysaa:

- Qaabka adeegga dhammeystiran, ee uu qofku xuddunta u yahay.
- Tayada daryeelka waxayna suuragelinayaan helidda kheyraadyada.
- Isdhexgalka bulshada iyadoo la adeegsanayo taageero lacagteeda la bixiyay iyo mid aan la bixin.
- Ku-xirnaanta asaaga.
- Caafimaadka shakhsiyeed iyo bedqabka.
- Deegaan nololeed ammaan ah.
- Adeegyada kale ee DDA.

### Miisaaniyad

Miisaaniyadeenna hadda waxay taageertaa ilaa 1,500 macmiil.



### Bah-wadaagta

- Macaamiisha DDA
- Xubnaha qoyska
- Wakiillada sharciga ah
- Adeeg-bixiyayaasha qandaraaska la siiyay:

### Xaq-u-yeelashada

Macaamiisha DDA waxay xaq u leeyihiin Maareynta Kiiska La Wanaajiyay haddii qiimeyntooda DDA ama dhacdooyinka dhowaan ay ka tarjumayaan walaacyada caafimaadka iyo bedqabka ee ku saabsan gooniyeynta, deegaanka guriga ama tayada daryeelka.

*(lagu sii wado bogga soo socda)*

Xiriirka: Heather Lum, Maamulaha Barnaamijka Maareynta Kiiska ee La Wanaajiyay • [Heather.lum@dshs.wa.gov](mailto:Heather.lum@dshs.wa.gov) • 360-407-1526



Washington State  
Department of Social  
& Health Services

Transforming lives

## Kormeerka

DSHS waxay isticmaalaysaa hannaanka dib-u-eegista iyo qiimeynta rasmiga ah ee lagu go'aaminayo haddii adeeg bixiyayaasha ay ka soo baxayaan shuruudaha aqoonsiga ee lagu qeexay 388-829A WAC, siyaasadaha DDA iyo qandaraaska DDA iyo in kale. DDA waxay sameynaysaa qiimeynta aqoonsiga ee adeeg bixiyayaasha qandaraaska la siiyay ugu yaraan sannadkiiba mar.

Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn ee DSHS waxay baarayaan cabashooyinka ku saabsan xadgudubka, dayaca, dhiig-miirashada, dhiigmiirashada maaliyadeed ama in macaamiisha si xun loola dhaqmo.

## Dibadda

- Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn ee DSHS.
- Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid.
- Xafiiska Hantidhowraha Gobolka Washington.
- Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington.

## Gudaha

- Xafiiska U-hoggaansamidda, Korjoogteynta iyo Tababbarka ee DDA.
- Xafiiska DDA ee Barnaamijyada Tayada leh iyo Ku Lug Lahaanshaha Daneeyaha.



## Awoodda

[Madaxa 71A RCW](#), naafonimooyinka koritaanka

[RCW 71A.12.320](#), halista xadgudubka iyo dayaca — hannaanka — booqashooyinka guriga

[Cutubka 388-829B WAC](#), Barnaamijka Maareynta Kiiska La Wanaajiyay

DDA ayaa sameeyay Barnaamijka Maareynta Kiiska La Wanaajiyay isagoo ka jawaabaya Hindise-sharciyeedka Aqalka Sare ee tirsigiisu yahay 6564, *Ilaalinta Shakhsiyadka Naafonimooyinka Koritaanka leh.*